## Waa maxay baadhis maqal?

Dhamaan ilmaha dhashay waxa laga baadhaa calaamadaha qaar ka mid ah dhibatooyin caafimaad oo ah suurtogal. Tijaabooyinkaas waxa loogu yeedhaa baadhitaano.

## Waa maxay baadhista maqalka ee ilmo dhawaan dhashay?

Ilmahaaga dhawaan-dhaladka ah waxa isaga oo cisbitaalka jooga laga fiirin doonaa inuu wax dhib ah ka qabo maqalka.

## Sidee ayaa loo sameeyaa baadhista maqalka?

Mishiin gaar ah ayaa muujin doona haddii ilmahaagu uu ka jawaabayo sanqadha ama codadka. Baadhistu waa mid fudud oo aan waxba yeelayn ilmahaaga. Natiijooyinka waxa laguu sheegi doonaa ka hor inta aanad ka bixin cisbitaalka.

## Waa maxay sababta ay muhiim u tahay in la baadho maqalka ilmahaaga?

Haddii ilmahaagu qabo lumis maqal waxa muhiim ah in la ogaado goor hore oo la siiyo gargaar ah xagga waxbarashada iyo luqadda.

*Qiyaastii 3 ilaa 4 ka mid ah 1,000-kii ilmo ayaa qabi doona nooc ah lumis maqal marka ay dhashaan.*



*Baadhis ah la-sii-socod ayaa aad u muhiim ah. Haddii ilmahaagu qabo lumis maqal, waxa aad jeclaan doontaa inaad goor hore ogaatid.*

## Waa maxay macnaha haddii ilmahaagu aanuu ku gudbin baadhista maqalka?

Haddii ilmahaagu aanu ku gudbin baadhista maqalka, macnaheedu waxa weeye ilmahaagu waxa uu u baahan yahay baadhis dheeraad ah. Baadhitaanadaasi waxay war dheeraad ah kaa siin doonaa maqalka ilmahaaga.

## Halkee baad u tagi doontaa baadhis maqal oo la-sii-socod ah?

Cisbitaalka ayaa ilmahaaga u sameyn doona ballan ah baadhis maqal oo la-sii-socod ah. Haddii cisbitaalku aanuu ku siin ballan, waxa aad wici kartaa Universal Newborn Hearing Screening Program (Barnaamijka Baadhista Maqalka ee Dhawaan-dhaladka) oo teleefonkiisu yahay 800-882-1435 si aad u ogaato meesha aad u tagayso baadhitaan ku-celin ah.

## Maxaan sameeyaa haddii ilmahayga lagu sheego inuu qabo lumis maqal?

Qoysasku waxay la shaqeeyaan dhakhtarka ilmahooda, maqal-yaqaanka (audiologist), iyo bixiyeyaasha daryeel caafimaad ee kale si go'aan looga gaadho adeegyada muhiim u ah ilmahooda. Badanaa qoysasku waxay isticmaalaan Early Intervention Program (Barnaamijka Wax-ka-qabashada Goor Hore) ee beeshooda, kaasoo bixiya adeegyo ku saleysan baahiyaha ilmaha iyo qoyska.

Universal
Newborn Hearing
Screening Program

*Ilmo badan oo dhawaan dhashay oo qaba lumis maqal ayaa ku nuuxsan doona sanqadha ama qaylada weyn. Kaliya baadhis maqal ayaa kuu sheegi karta in ilmahaagu qabo lumis maqal iyo in kale.*

**Ilmaha qaarkood waxay u baahan yihiin baadhis dheeraad ah xiitaa haddii ay ku gudbeen baadhis maqal markii ay dhasheen. Waxa muhiim ah inaad la hadashid dhakhtarka ilmahaaga oo aad sameysatid ballan ah baadhis maqal oo dheeraad ah haddii:**

* Qof ka tirsan qoyskaaga ayaa dhagoole ahaa ama dhego cuslaa ilaa markii uu dhashay, ama waxa ka lumay maqalka intii uu ku jiray caruurnimadii hore
* Hooyada waxa ku dhacay cudur intii ay uurka lahayd, sida finanka herbis (herpes) ama jadeeco jarmal (rubella)
* Ilmahaaga waxa ku dhacay cudur ama jiro daran oo keentay in lagu daweeyo Neonatal Intensive Care Unit (NICU) (Qaybta Daryeelka Siyaadada ah ee Dhawaan-dhaladka)
* Waxa aad ka walwalsan tahay in ilmahaagu aanuu wax u baranaynin sida ilmaha ay isku da'da yihiin
* Nuunuugaagu ama Ilmahaaga yar waxa uu yeeshaa cuduro dhego oo badan
* Nuunuugaagu ama ilmahaaga yar waxa uu qabaa cudur culus sida meninjaytis (meningitis)
* Nuunuugaagu ama ilmahaaga yar waxa uu ka dhaawacmay madaxa
* Nuunuugaagu ama ilmahaaga yar uu qabo cilad laga yaabo inay keento lumis maqal

**Universal Newborn Hearing Screening Program (Barnaamijka Baadhista Maqalka Dhawaan-dhaladka ee Universal)**

* Taageero qoys
* Gargaar-gaadhsiin iyo waxbarid
* Taageero ah waalid-ka-waalid
* War iyo sii-gudbin
* Gargaar farsamo oo la siiyo qoysaska, goobaha umulinta, iyo xarumaha baadhista maqalka
* War la siiyo qoysaska, xirfadleyda caafimaadka, iyo Wax-ka-qabashada Goor Hore (Early Intervention)
* La-xidhiidhin adeegyada iyo illaha la heli karo


**Waxa uu Universal Newborn Hearing Screening Program (Barnaamijka Baadhista Maqalka Dhawaan-dhaladka ee Universal) qoysaska ka gargaaraa inay helaan adeegyada ay u baahan yihiin.**
**Na soo wac maanta haddii aad qabtid wax su'aalo ah ama aad rabtid inaad ogaatid meesha laga helo baadhis maqal.**

Universal Newborn Hearing Screening Program

**War qoysaska loogu talogalay, soo wac ama soo dir iimayl**
**Cod 800-882-1435**
**TTY 617-624-5992**
**Iimayl: newborn.hearing@state.ma.us**

Soo-saarista qoraalkan waxa qayb ahaan taageero ka geystay Department of Health and Human Services Health Resources and Services Administration, Maternal and Child Health Bureau (Wasaaradda Caafimaadka iyo Adeegyada Bini'aadanka, Maamulka Ilaha iyo Adeegyada Caafimaadka, Xafiiska Caafimaadka Hooyada iyo Ilmaha), CFDA No. 93.251 Grant No. 5 H61 MC 00002-03

Somali




# Ilmahaagu ma maqli karaa heestan caruurta?

Universal Newborn Hearing Screening Program